

Baaq Shacab

18^{ka} May 2020

Annaga oo ah muwaadiniinta reer Somaliland ee magacyadoodu hoos ku saxeexan yihiin waxa aanu maanta oo taariikhdu tahay 18^{ka} May 2020 soo saarnay Baaq Shacab:

Maanta waxa ay ku beegan tahay sagaal iyo labaatan guuradii xuska dharaartii lagaga dhawaaqay magaalada Burco gooni-isu-taagga Somaliland; kadib wadatashi shacab oo ay horseed u ahaayeen ergo meteleysay gobollada dalka oo dhan. Ujeeddada iyo yoolka loo unkay qaran madax-bannaan oo ay hantiyaan dadwaynaha Somaliland waxa ahayd in la dhiso “dawladnimo ummadda wada deeqda, la mahadiyo, kuna dhisan sinnaan iyo caddaalad,” sida ku qoran Dastuurka Somaliland. Dawladnimada ay wada dhiste shacabka Somaliland waxa mabaadi’ u ah:

- b. Shareecada Islaamka.
- t. Go'aan qaadasho ku timaadda talo-wadaag.
- j. Isu-dheellitirnaanta awoodda dawladnimo oo u qaybsanta Sharci-dejinta, Fulinta iyo Garsoorka.
- x. Baahinta iyo hoos-u-daadejinta maamulka Xukuumadda (Decentralisaton).
- kh. Damaanad-qaadista lahaanshaha gaar ahaaneed iyo xaq dhowridda suuqa xorta ah.
- d. Qiimo-weynida nolosha qofka oo la imanaysa sugidda xuquuqda asaasiga ah iyo xorriyadaha qofka.
- e. Nabadgelyo iyo habsami kula dhaqanka dawladaha gobolka iyo adduunweynaha.

Annaga oo ogsoon dadaalka naf hurista ah ee bulshada Somaliland ugu jiraan ilaalinta nabada, wadajirka shacabka iyo kobcinta nolosha taas oo keentay guulo ballaadhan oo adduunku mahadiyay, waxa aan indhaha laga qarsan karin, habboonna in la is-waydiiyo sagaal iyo labaatan sanadood kadib Dawladda Somaliland ma tahay mid ku shaqaynaysa si waafaqsan rabitaanka shacabka iyo yoolkii aasaaska qarankan, kaas oo ku dhisan mabaadi'da Dastuuriga ah ee sinnaanta muwaadiniinta, caddaaladda, talo-wadaagga, is-dheelitirka awoodaha iyo sugidda xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyadda qofka.

Ergadii ku dhawaaqday Somaliland 18^{kii} May 1991 iyo shacabkii u codeeyey Dastuurka 2001 waxa ay ku heshiiyeen in dawladnimadu noqoto mid ka bedqabta cudurrada dilaaga ah ee ay ka mid yihiin qabyaaladda, eexda, sed bursiga iyo isu joojin la'aanta. Waxa kale oo ay ku heshiiyeen in la ilaaliyo xorriyaadka muwaadiniinta ee cabbiridda aragtida, ka qayb qaadashada siyaasadda iyo xuquuqaha madaniga ah.

Taas beddelkeeda, Somaliland waxa ka dhaca ku-tumasho sharci, xadhig siyaasadeed iyo cabudhin ka dhan ah warbaahinta, siyaasiyiinta, iyo muwaadiniinta cabbira aragtiyohooda. Waxa kale oo si joogto ah u dhaca ku-xadgudub madaxbannaanida Golayaasha Sharcidejinta iyo Garsoorka oo aan shaqadooda u madax bannaanayn, iyada oo xadhigga xildhibaanada iyo masuuliyiinta xisbiyada mucaaradku yihiin kuwo soo noqnoqda. Deeqaha iyo miisaaniyadda Somaliland looma qaybiyo si caddaalad ah oo ay u siman yihiin gobollada dalka oo dhan.








Si ka duwan mabaadii'dii lagu unkay dalkan, aragtida dawladnimada Somaliland waxa saldhig u noqday qabyaalad, eex, sed-bursi iwm. Iyada oo shaqo-gelinta shaqaale hoosaadka ilaa xulushada masuulka xafiiska dawladeed ee sare lagu eego indhaha qabiilka oo keliya ah. Somaliland, waxay dawladdii Siyaad Barre kala mid tahay ku-urursanaanta maamulka ee caasimadda. Marka laga reebo hay'adaha dakhli ururinta iyo ciidammada, gobollada dalka waxa gabaabsi ka ah

daadeqsanaanta maamulka iyada oo aanay jirin dareen ka war haya dawladnimo oo nolosha muwaadinka kor u qaada.










Waxa marag ma-doon ah in dawladdu ka leexatay gaadhista yoolkii loo abuuray. Dhammaan dadkii dhashay 1991 iyo wixii ka danbeeyey weligood ma helin fursad ay ugu codeeyaan Baarlamaan metela. Waxa baahsan shaqo la'aanta, sinnaan la'aanta, caddaalad darada iyada oo hoos u dhaca wayni ku yimi wada-tashiga iyo ixtiraamka xuquuqda aasaasiga ah iyo xorriyaadka qofka.

Waxa aanu u aragnaa in Dawladda Somaliland baal martay heshiisyadii lagu galay shirarkii Burco ee 27^{kii} April ilaa 5^{tii} May 1991, Shirkii Boorame ee 24^{kii} January ilaa 25^{kii} May 1993kii iyo Dastuurka Somaliland ee la ansixiyay 2001.




Sidaas darteed, Baaqan Shacab ee ay soo saareen saxeexayaashu wuxuu ugu yeedhayaa dawladda Somaliland inay ku soo noqoto heshiisyada bulsho, ixtiraamto dastuurka oo ay dalka ku soo dabaasho hanaan dimoqraadi ah, sinaan iyo caddaalad.




NO	MAGACA	SAXEEXA
1	Cismaan Axmed Mohamed	
2	Maxamed Xaji Cali Ibrahim	
3	Liibaan Aadan Sawaxiir	
4	Caafil Maxamed Cawil	
5	Maxamed Kayse Bigeyee	
6	Mubarek Abdirahman Hare	
7	Calixtaaliq Cumar Xiriif	
8	Xasan Cali Bulaale	
9	C. Karim Qadiib Cabsiye	
10	Xamse Cabdalla Maxamed	
11	Elrashid Mohamed Adam	
12	Jamool Xuseen Axmed	
13	Amin Hassan Osman	
14	Masruur Elshakur Axmed	
15	Guleed Ahmed Jama	
16	Yasmin Cumar Xaaji	
17	Guled Maxamed Ismaaciil	
18	Cabdiraxmaan Ibrahim Aadan	
19	Huda Ali Hassan	
20		

Saxeexayaasha Baaqa Shacab ee 18ka May 2020

NO.	MAGACA	SAXEEXA
1.	Maxamed Abiib yuusuf	
2.	Bashir Maxamed Bashir	
3.	Mohamed Abdussayid Sh. Ali	
4.	Abdullahi Cabdulahi Ismail	
5.	Mohamoud Farah Warsame	
6.	Nimco omer Hussein	
7.	Ahmed Hussein Hirsi	
8.	Muxyadiin Nuur Cabdi	
9.	A. Rashid mahamed idiris	
10.	Abdikadir Baror Cali	
11.	Abdi Latif Mohamed Mohamoud	
12.	Yusuf Muxamed Kaahin	
13.	Mohamoud Cali Jaamac	
14.	Wali Jaamac Ahmed	
15.	Nimcan Nuur Hirsi	
16.	Muxyadiin Cabdi Nuur	
17.	Cabdi Cilmi Nuur	
18.	Yousouf Ibrahim Aden	
19.		
20.		

Saxeexayaasha Baaqa Shacab ee 18ka May 2020

NO.	MAGACA	SAXEEXA
1.	Alnassir Ahmed Alrahmani	
2.	Abdirizq Ahmed Saleh	
3.	Maxamed Siid Faalax	
4.	Ahmed Warsame Isle	
5.	Cumar Yasin Ismaaciil	
6.	Mohamed Jacek Xasan	
7.	Mohed Mohoud Hassari	
8.	Yasin Mohamed Farah	
9.	Siid Cabdi Xasan	
10.	Ahmed Mohamed Ahmed	
11.	A/risak MOHAMED AHMED	
12.	Ahmed Shira Mohamed	
13.	Muhammed Jama Yusuf	
14.	Ismaaciil Aulil Saleh	
15.	C/raashid Xaleh Cabdiraxman	
16.	Bashir Mirze Jama	
17.	Fadi Siid Jaamac	
18.	Maxamed Cuman Maxamed	
19.	Maxed Maxud Cawed	
20.	Ahmed Jama Hussein	

NO	MAGACA	SAXEEXA
1	maxamed Hadi Abdi Ismail	
2	Maxamed Xasan Fawdhan	
3	Mustafe maxamed cismaan	
4	Axmed Cabdi Xasan	
5	Mohamed Ahmed Jama	
6	Kisari Mohamed Gamadid	
7	Abubakar Abdi Adhikari	
8	Abdulkadir Hassan Aden	
9	Cabdi ismaaciil Xasan	
10	Ahmed Kayse Hayse	
11	Mohamed Cali Heeli	
12	Maxamed C/lehi Isaci	
13	A/Raxman axmed ismaaciil	
14	Mohamed Ismail Esse	
15	CHALID Mohamed Abdi	
16	Abdifateh Suleiman Awil	
17	Xasan Cabdi Jama	
18	Muyrax Cismaan Maxamed	
19	Mohamed Ali Farah	
20	Ahmed Ismael Ahmed	

Saxeexayaasha Baaqa Shacab ee 18ka May 2020

NO.	MAGACA	SAXEEXA
1.	Ugbaad Cabdi Xassan	Ugbaad
2.	Holna Xassan Siid	Holna
3.	Mustafe maxamed Yuusuf	Mustafe
4.	Mawliid Daahir Cali	Mawliid
5.	C/khalag maxamed Cali	C/khalag
6.	Asma Siid Saalax	Asma
7.	Ayaan Maxamed Faarax	Ayaan
8.	Sahra Iadan Maxamed	Sahra
9.	Aasiga maxamed Gulad	Aasiga
10.	Umuukhayr Cismaan daahir	Umuukhayr
11.		
12.		
13.		
14.		
15.		
16.		
17.		
18.		
19.		
20.		

NO	MAGACA	SAXEEXA
1	Abdigani Gisman Maxamed	Amuf
2	Maxamed Mawlid Keyse	Amuf
3	Hanaal Cabdi Yuusuf	Amuf
4	Hana Asaf Dahir	Amuf
5	Mohamed Saleh Cumar	Amuf
6	Barkhad Aadan Faysal	Amuf
7	Cabdulqadir Cabdullaahi	Amuf
8	Abdi Mijiga Maxamed Buraale	Amuf
9	Cabdullaahi Ismaaciil	Amuf
10	Abdulkadir Maxamed Jama	Amuf
11	Amir Koon Axmed	Amuf
12		
13		
14		
15		
16		
17		
18		
19		
20		